| Waaxda Booliiska Minneapolis<br>Buugga Xeerka iyo Nidaamka Booliiska | Lambar:<br>5-300 |
|---|---|
| **Mujalladda shanaad - Xeerka Anshaxa iyo Isticmaalka Xoogga** | |
| **Isticmaalka xoogga** | |

DRAFT

## 5-308 Doorashada Xakamaynta: Hawada kiimikaysan ee la buufiyo

(xx/xx/23)
Dib u eegis lagu sameeyay xeerarkii hore: (10/16/02) (08/17/07) (10/01/10) (09/04/12) (06/10/13) (06/16/20) (08/21/20) (09/08/20) (12/22/20) (04/04/21) (01/01/23)

### I. Ujeedo

Ujeedada xeerkan ayaa ah in la ballaariyo shuruudaha xeerarka kale ee xoogga, gaar ahaan kuwa la xiriira Hawada kiimikaysan ee la buufiyo

### II. Qeexitaano

**Erayada lagu qeexay P&P 5-304:**

- Qaadis
- Geyn
- Ridista
- Muujin
- Ku howlan la beegsadaha
- Ku taagis
- Isticmaal

### III. Xeer

**A. Xeerka iyo Mabaadi'da Hagiddd**

Marka lagu daro u gaar ahaanshaha xeerkan, shaqaaluhu waa inay raacaan shuruudaha dhammaan xeerarka kale ee khuseeya, oo ay ku jiraan laakiin aan ku xaddidnayn, Mabaadi'da Hagidda iyo heerarka kale ee P&P 5-301.

**B. Hawada kiimikaysan ee la buufiyo ee Awoodda aan wax dileyn**

Hawada kiimikaysan ee la buufiyo waa nooc ka mid ah awood aan wax dileyn taas oo dadka qaar u keeni karta khatar sare

**C. Hawada Kiimikaysan ee la Buufiyo ee Waaxdu Bixiso**

Saraakiisha MPD waxa kaliya oo loo ogolyahay inay qaadaan hawadakiimikaysan ee la buufiyo ee ay bixiso waaxdu. Hawada kiimikaysan ee la buufiyo ee shakhsi ahaan aw

leeyahay, ama kuwa ay bixiso hay'ad kale, looma ogola in la qaado ama laga faa'iidaysto inta uu sarkaalka MPD ku dhaqmayo awoodooda rasmiga ah ee MPD.

**D. Waafaqsan Xeerka iyo Tababarka**

Saraakiishu waa inay u isticmaalaan oo kaliya hawada kiimikaysan ee la buufiyo si aan kala sooc lahayn, waana marka aw xooggaasi macquul yahay oo uu waafaqsanyahay tababarada MPD ee hadda jira iyo xeerarka MPD ee xukuma isticmaalka xoogga (oo ay ku jiraan dhammaan qaybaha P&P 5-300). oo ay ku jirto marka loo isticmaalo kala burinta ama ilaalinta.

**E. Rabshadaha Madaniga ah iyo Isku-imaanshaha**

Hawada kiimikaysan ee la buufiyo, iyadoon loo eegin cabbirka qasaca, waa in la ridaa kaliya inta lagu jiro rabshadaha madaniga ah iyoisku-imaanshaha waa inay dhacaan kaliya si waafaqsan P&P 7-805.

**F. Xaaladaha la Isticmaalayo**

1. Dadka aan xakamaysnayn

   Xaaladaha aan ku lug lahayn rabshadaha rayidka ama isku imaatanka, hawada kiimikaysan ee la buufiyo waa in la sameeyaa keliya:

   a. Marka xooga noocaas ahi ay lagama maarmaan noqoto si looga ilaaliyo sarkaalka, la beegsadaha, ama qolo kale waxyeello jireed oo si ula kac ah u dhici karta.

   ama

   b. La beegsadayaasha sida fir-fircoon uga-hortaga haddii isku dayo yar oo lagu xakameynayo ay yihiin ama ay u badan tahay inay noqdaan kuwo aan waxtar lahayn (sida ku cad qaybta P&P 5-301 ee xoogga macquulka ah ee ujeeddada waafaqsan xeerka, sharciga, iyo tababarka).

2. Dadka xakamaysan

   a. Saraakiishu ma u isticmaali karaan hawada kiimikaysan ee la buufiyo qof kasta oo katiinadaysan ama si kale loo xakameeyay, ilaa uu qofku soo bandhigo khatar jidheed oo soo socota oo ku wajahan badbaadada sarkaalka, qofka laftiisa ama dadka kale.

   b. Kahor intaanad qofka u isticmaalin hawada kiimikaysan ee la buufiyo, saraakiishu waa inay marka hore isku dayaan inay xakameeyaan qofka iyagoo isticmaalaya tillaabooyinka ku xakamaynta gacan maran ama farsamooyinka xakamaynta marka ay suurtogal tahay.

   c. Saraakiishu waa in ay isticmaalaan hawada kiimikaysan ee la buufiyo oo keliya marka ay dhammaan tallaabooyinka xakamaynta gacanta maran ee jilicsan ama

DRAFT

farsamooyinka xakamaynta uu isticmaalo sarkaalku, iyo haddii khatarta jidheed ee soo socota ay sii socoto.

3. Aan si toos ah u diidanayn

   Hawada kiimikaysan ee la buufiyo lagama yaabo in lagu sii daayo dadka u hoggaansan ama si aan toos ahayn u diida sida lagu qeexay xeerka.

4. Liqidda daroogada

   Waa mamnuuc in lagu buufiyo hawada kiimikaysan si looga hortago liqidda walxaha maandooriyaha.

**G. Isticmaalka Hawada Kiimikaysan ee la Buufiyo**

1. Digniin ayaa loobaahanyahay

   Saraakiishu waa inay isticmaalaan hawada kiimikaysan ee la buufiyo ka dib digniin ku filan, marka ay suurtagal tahay.

2. Dib-u-qiimee marka ay gaarto

   Saraakiishu waa in ay joojiyaan isticmaalka buufinta marka ay gaarto hawada kiimikaysan ee la buufiyo qofka ama dadka loogu talagalay, si ay dib ugu qiimeeyaan xaaladda iyo heerka khatarta iyo in ay go'aamiyaan in isticmaalka dambe ee buufinta ay habboon tahay.

3. Kaliya gaarsii dadka loogu talagalay

   Shaqaalaha MPD ee la dhaariyay waa inay ku dadaalaan sidii ay u hubin lahaayeen in dadka loogu talagalay oo kaliya ay hawada kiimikaysan ee la buufiyo ay gaarto.

**H. Daawaynta iyo Gargaarka Caafimaadka ee Hawada Sumeysan ee la Buufiyay**

1. Marka lagu daro daawaynta caadiga ah ka dib isticmaalka xoogga (sida ku cad qaybta P&P 5-301), daawaynta ka dib marka qofka uu la kulmo hawada kiimikaysan waa in uu ku jiraa mid ama ka badan kuwan soo socda:

   - Ka saar qofka ay wax gaareen aaga sumeysan.
   - U bandhig qofka suntu gaartay hawo nadiif ah.
   - Ka raaci indhaha iyo maqaarka qofka sumeysan biyo qabow (haddii la heli karo).

2. Shaqaalaha la dhaariyay waa in uu si dhaw ula socdaa qofka sunta hawada kiimikaysan ay gaartay ilaa lagu wareejiyo shaqaalaha caafimaadka ama kuwa kale ee sharci fulinta.

3. Askariga wareejinaya haynta qofka sunta hawada kiimikaysan ay gaartay waa inuu ku wargeliyaa hay'adda la wareegeysa haynta in qofka ay gaartay sunta kiimikada.